VERMONT LEGAL AID

Homeowner Legal Assistance Project
264 N. Winooski Ave., Burlington, VT 05401
802-863-5620 ■ 800-789-4195
www.vtlawhelp.org ■ Fax: 802-863-7152

Su'aalaha Badanaa La isweydiiyo (FAQ) ee Warqada Guri Wareejinta Intaad Nooshahay

Ogeysiin Muhiim ah

Warbixinta ku jirto FAQs-kaan waxaa loogu tallogalay ujeedooyinka aan warbixinta aheyn. Iyadoo warbixinta ay sax aheyd laga bilaabo Agoosto 13, 2024, sharciyada waxaa laga yaabaa inay isbadeleen. Waa inaad aragtaa qareen si aad u heshid tallo sharci ah oo dhameystiran, sax ah, oo cusub oo ku saabsan xaalada gaarka ah.

Haddii aad u baahantahay qareen laakin aadan awoodin, kala soo xiriir Gargaarka Sharciga Vermont 1-800-889-2047. Waxaa kuu suurtogeli karto inaad heshid caawin sharci oo bilaash ah.

Waa maxay warqada guri wareejinta intaad nooshahay?

Warqada guri wareejinta intaad nooshahay (ELED) ayaa ka caawin karo milkiilaha guri inay uga tagaan gurigooda qofka ama dadka ay doortaan markay dhintaan kadib. Milkiilaha guriga ayaa weli gaari karo go'aamo ku saabsan guriga inta lagu jiro waqtigooda nolosha. Sidoo kale, milkiilaha guriga ayaa badeli karo ama joojin karo ELED xili walba. Markii milkiilaha guriga uu dhinto, guriga wuxuu aadaa qofka ama dadka ay doortaan iyagoon marin maxkamada dambiyada.

Waa maxay ujeedka ELED?

ELED waxaa loo isticmaalaa ujeedooyinka qorsheynta hantida. ELED ayaa u ogolaado shaqsiyaadka inay si habsami leh oo degdeg ah ugu wareejiyaan hanti maguurtada. Sidoo kale, guriga wuxuu helaa sare u qaadista canshuurta ku saleysan canshuurta faa'idada raasumaalka markii uu dhinto bixiyaha.

ELED ayaa sidoo kale badbaadiso waqti iyo lacag iyagoo ku caawinayo guriga inuu ka fogaado inuu maro maxkamada dambiyada.

ELED ayaa sidoo kale ka caawiso milkiilaha hadda (bixiyaha) inuu lahaado xakameynta ugu weyn ee dhismaha inta lagu jiro waqtiga nolosha. Bixiyaha ayaa isticmaali karo, kireyn karo, ama xattaa iibin karo isagoon uga baahneyn ogolaansho qaataha (qaatayaasha).

Miyuu milkiilaha hadda (bixiyaha) badeli karaa maankooda ku saabsan ELED?

Bixiyaha ELED ayaa badeli karo maankooda oo dib u qaadan karo ama badeli karo bixinta iyadoon jirin ogolaanshaha qaataha (qaatayaasha).

“Ka laabashada” waxaa loola jeedaa joojinta ELED. Bixiyaha ayaa ka laaban karo ELED markii bixiyaha uu diiwaangeliyo lahaansho cusub ee ka imaanayo naftooda ku naftooda.

“Dib u badelida” waxaa loola jeedaa ka badelida qaataha ELED. Bixiyaha ayaa badeli karo ELED isagoo diiwaangelinayo ELED. Bixiyaha ayaa magacaabi karo qaate cusub. Bixiyaha ayaa ku dari karo qaatayaal isagoo ku darayo magaca qaataha hore iyo magacyada qaatayaasha cusub. ELED la badelay waxay badeshaa ELED kii hore. Si aad ugu dartid qaatayaal badan ELED ka jiray, ELED ka cusub waa inuu magacaabaa dhammaan qaatayaasha.

Sidee ayay warqada guri wareejinta intaad nooshahay u qeybisaa milkiilanimada guriga?

Milkiilaha asalka ah ayaa ah *bixiyaha*. Bixiyaha ayaa joogteeyo danaha hantida nolosha ee sharciga guud ee guriga. Tan ayaa ka dhigan inay xaq u leeyihiin inay gudbiyaan, isticmaalaan, ka faa’idaan, iyo ku noolaadaan guriga oo muddada noloshooda.

ELED ayaa magacaabo ha *qaate ama ka badan* kuwaasoo helayo guriga markii bixiyaha dhinto. Qaataha ayaa noqon karo qof walba, shirkad, ama hay’ada. Badanaa, bixiyaha ayaa u magacaabo xaaska, canug, ama canug awoode sida qaataha.

Maxaa dhaco haddii qaataha uu dhinto bixiyaha ka hor?

Haddii uu jiro kaliya hal qaate, kadib danahooda waxay u wareegeysaa dhaxlayaasha qaatahaas ama ka faa’idayaasha.

Haddii ay tahay qaataha *wada lahaanshaha*, markaas danaha qaataha waxay u wareegeysaa dhaxal sugahooda ama ka faa’ideystayaasha. Wada lahaanshaha waxaa loola jeedaa in labo qaate ama ka badan ay leeyihiin milkiilanimada danaha guriga. Dahanaha milkiilanimadooda looma baahno inay sinnaato. Dhammaan qaatayaasha waxay leeyihiin xaquuq simman oo lagu isticmaalo guriga.

Haddii ay tahay qaataha *wada lahaanshaha simman*, markaa danahooda waxay u wareegeysaa qaataha (qaatayaal) walba ee nool. Wada lahaanshaha simman waxaa loola jeedaa in labo qaate ama ka badan oo isla leh danaha guriga. Danaha milkiilanimada way simmanyihiin illaamaa ay ELED u qeybiso danaha milkiilanimada si

simman. Dhammaan qaatayaasha waxay leeyihiin xaquuq simman oo lagu isticmaalo guriga.

Miyuu qaataha u baahanyahay inuu aqbalo danaha guriga?

ELED ayaa shaqeyneyso iyadoon jirin aqbalida qaataha inta lagu jiro nolosha bixiyaha. Laakiin haddii bixiyaha iyo qaataha wada qorsheeyaan, waxay sameysan karaan qorshaha ugu fiican.

Miyuu qaataha u baahanyahay inuu siiyo bixiyaha danaha guriga?

Maya, ELED waxay shaqeysaa iyadoon jirin wax tixgelino ah. Tixgelinta ayaa ah wax qaataha siiyo bixiyaha oo badel u ah guriga. Tusaalaha ayaa noqonayo lacag bixin ama balan qaad lagu sameynayo wax badel u ah guriga.

Miyuu qaataha gudbin karaa danahooda guriga ka hor inta uusan bixiyaha dhiman?

Qaataha lagu magacaabay ELED ma gudbin karo qeybta danaha haray ee qaataha inta lagu jiro waqtiga nolosha bixiyaha. Tusaale ahaan, qaataha kuma iibin karo danahooda guriga ka hor inta uusan bixiyaha dhiman. Isku day walba sidaas lagu sameynayo ma shaqeyneyso.

Miyay jiraan wax warqada guri wareejinta intaad nooshahay <u>aysan</u> sameynin?

ELED ma saameyso xaquuqaha milkiilanimada bixiyaha inta lagu jiro nolosha bixiyaha.

ELED ma saameyso xaquuqaha amaahiyaha bixiyaha. Deymaha guriga ama rahan walba waxay la yaalayaan guriga iyo qaataha wuxuu qaataa rahan/deynta guriga walba.

ELED ma siiyo danno qaataha <u>illaa dhimashada bixiyaha</u>.

ELED ma quseyso hanti maguurtada bixiyaha si looga baaran dago amaahiyaha qaataha. Marka, amaahiyayaasha qaataha ma qaadi karo rahanka guriga.

Miyay warqada guri wareejinta intaad nooshahay u shaqeysaa sida uga dhaqsiha badan oo la saxiixo?

Maya, ELED waa inay ahaataa (1) si sax loo fulliyaa iyo (2) lagu diiwaaniyo diiwaanada dhulka inay shaqeeyaan.

Si sax ah loo fuliyay waxaa loola jeedaa inuu ku saxiixaa oo taariiqeeyo bixiyaha ama bixiyayaasha nootaayo horteeda oo la nootaayeeyaa.

Gudaha Vermont, dhammaan diiwaanada dhulka waa la diiwaaniyaa oo waxaa lagu keydiyaa heerka deegaanka. Caadi ahaan, waxaa lagu xareeyaa oo lagu diiwaaniyaa xafiiska karaaniga magaalada. Waa inaad ku diiwaangelisaa ELED degmada meesha hanti maguurtada ku taalo. Karaaniga magaalada ma diiwaanin karo ELED iyadoon jirin canshuur celinta wareejinta guriga. Qidmada diiwaangelinta waa $15 bogiiba ee ELED, iyo $15 lagu diiwaaninayo canshuur celinta wareejinta guriga.

Waa maxay saameynta deynta guriga ay ku leedahay ELED?

Haddii bixiyaha siiyo deynta guriga kadib diiwaangelinta ELED, deynta guriga ma burineyso ama ma badeleyso ELED.

Deynta guriga ma saameyso dannaha guriga la gudbiyay iyo lagu keydiyay ELED. Qaataha ayaa u qaato danaha maadada deynta guriga.

Waa maxay saameynta Champlain Housing Trust (CHT) axdiga kabida guriyeynta (Housing Subsidy Covenant, HSC) ee ELED?

A CHT HSC way saameysaa danaha guriga la soo gudbiyo oo lagu bixiyo ELED. Qaataha wuxuu dul saar ka qaataa sida waafaqsan CHT HSC.

Haddii bixiyaha uu leeyahay CHT HSC, kadib ELED waa inuu ku tixraacaa qoraal ahaan.

Waa maxay canshuur wareejinta guriga?

Canshuur wareejinta guriga waa canshuurta ku wareejinta magaca hanti maguurtada ku taalo Vermont. ELED la fulliyay oo la diiwaaniyay ayaa ah maadada sharuudaha canshuur wareejinta guriga.

Yaa leh canshuur wareejinta guriga?

Canshuur wareejinta guriga waxaa laga rabaa qaataha ELED illaamaa qaataha iyo bixiyaha ay leeyihiin heshiis qoran oo sheegayo in bixiyaha laga rabo canshuur wareejinta.

Goorma ayaa la iska rabaa lacag bixinta canshuur wareejinta guriga?

Lacag bixinta canshuur wareejinta guriga waxaa la iska rabaa 30 maalmood gudahood ee ka bilaabaneyso diiwaaninta ELED.

Miyay jiraan ka dhaafida qaar ee canshuur wareejinta guriga?

Haa. Ma jiraan canshuur wareejinta guriga la rabo haddii wareejinta ay ka dhaxeyso noocyada qaar ee dadka iyadoon tixgelin jirin. Wareejinta u dhaxeyso noocyada xiggo ee dadka waa laga dhaafaa:

- Labo xaasas,
- waalid iyo canug ama xaaska canuga ah, ama
- awowga/ayeyda iyo canuga awowga/ayeyda ama xaaska canuga awowga.

Sidee ayaa qiyamka loogu go'aamiyaa Canshuur Wareejinta Guriga ee ELED?

Qiyamka, ama cadadka doolarka, ee lagu xisaabiyo canshuur wareejinta waxay ku saleysantahay qaab sharciyeed. Qiyamka kuma saleysna qiimaha iibka ee hanti maguurtada, sababtoo ah hanti maguurtada lama iibin.

Qiyamka waa qiyamka Guriga La canshuuri karo ee guriga waqtiga wareejinta, lagu dhuftay xaqiiqda ay daabacaan Adeega Daqliga Gudaha oo ujeedooyinka qiimeynta guriga nool iyo haraayada sida waafaqsan 26 U.S.C. § 7520.

Xaqiiqda 7520 waxay ku saleysantahay da'da bixiyaha, jadwalada qiimeynta nolaanshaha la daabacay, iyo qiimaha danaha la daabacay ee bisha wareejinta.

Ma jiraan foomka Canshuur Celinta Wareejinta Guriga?

Si loo diiwaaniyo ELED, waa inaad ku xareysaa foomka Soo celinta Canshuur Wareejinta (PTT-172) Waaxda Canshuuraha iyo magaalada Vermont. Haddii ay ku jiraan wax ka badan hal bixiye ama hal qaate ELED, markaa waa inaad sidoo kale, soo xareysaa foom kale (PTT-175).

Ma inaan xareeyaa foomka Canshuur Celinta Canshuur Wareejinta xattaa haddii wareejinta laga dhaafo canshuurta wareejinta guriga?

Haa. Xattaa haddii wareejinta laga dhaafo canshuur wareejinta guriga bixiyaha waa inuu ku xareeyaa Canshuur Celinta Wareejinta Guriga Waaxda Canshuuraha iyo Magaalada Vermont. Foomka, bixiyaha wuxuu qoraa ka dhaafida.

Sidee ayaan u siiyaa Canshuur Wareejinta Guriga Waaxda Canshuuraha?

Onleenka: Waxaad si elektaroonig ahaan ugu bixin kartaa myVTax.

Boos Ahaan: Fadlan samee jeegag la siin karo Waaxda Canshuuraha Vermont oo buuxi Foomka PTT-173, Foojarka Lacag bixinta Wareejinta Guriga. Ku soo dir lacag

bixintaada iyo foojarka Waaxda Canshuuraha Vermont, 133 State Street, Montpelier, VT 05633-1401.

Sidee ayay ELED u saameysaa u qalmida codsadaha Medicaid?

Codsadaha Medicaid ayaa caadi ahaan weli u qalma Mediciad oo ma helo ganaaxa wareejinta haddii ay ku wareejinayaan gurigooda ELED.

Haddii guriga uu yahay deegaanka koowaad ee codsadaha Medicaid ama xaaskooda, guriga hanti ka dhaafid oo ujeedooyinka Medicaid (oo leh cadadka ugu badan oo $713,000 oo 2024 haddii xaas uusan daganeyn halkaas) oo aysan jirin ganaaxa wareejinta.

Iyadoon jirin ELED, mararka qaar waxaa jiro ganaaxa wareejinta haddii codsadaha Medicaid u wareejiyaan gurigooda wax ka yar qiyamka suuqa cadaalada oo shantii sanno ee la soo dhaafay ee codsashada daryeelka muddada dheer ee Mediciad. Ganaaxa wareejinta waa markii Mediciad joojiso bixinta daryeelka muddada dheer oo waqti muddo ah. Waqtiga muddada waxay ku xirantahay qiyamka guriga ee codsadaha Medicaid wareejiyo.

Waa maxay Barnaamijka Soo kabida Hantida Medicaid?

Shaqsiyaadka da’da 55 ama ka weyn, Vermont waxaa looga baahanyahay inay raadiyaan soo kabida lacag bixinada ka imaanayo hantida shaqsiga ee adeegyada xarunta xanaanada, adeegyada guriga iyo bulshada ku saleysan, iyo adeegyada isbitaalka iyo daawada qoraalka la xiriiro. Gobolada waxay leeyihiin iqtiyaarka lagu soo kabo lacag bixinada ee dhammaan adeegyada kale ee Medicaid ee la siiyay shaqsiyaadkaan, marka laga reebo qarash wadaaga Medicare ee lagu bixiyo matalaada ka faa’ideystayaasha Barnaamijka Kedinta Medicare.

Miyay ELED ka caawisaa in guriga ka fogaado Barnaamijka Soo kabida Hantida Medicaid?

Haa. Maadaama ELED ku wareejiso guriga qaataha (qaatayaasha) markii uu dhinto bixiyaha, guriga kama qeyb ahan hantida bixiyaha. Maadaama guriga uusan ka qeyb aheyn hantida bixiyaha, ma ahan hantida quseyso Barnaamijka Soo kabida Hantida Medicaid.

Waa muhiim in lala tashto qareen si aad u aragtid sida ELED ay si gaar ah ugu saameyso Medicaid ku jiro dacwadaada.

Ma rabtaa inaad hubisid in qaraabadaada ee dooqaaga ah ay dhaxlaan gurigaaga kadib markaad dhimato?

Warqada Guri Wareejinta Intaad Nooshahay waxay kaa caawin kartaa inaad uga tagto gurigaaga qofka ama dadka aad doorato kadib markaad dhimato. Weli go'aan ayaad ka gaari kartaa guriga intaad nooshahay. Sidoo kale, waad badeli kartaa ama waad joojin kartaa Warqada Guri Wareejinta Intaad Nooshahay xili walba. Faa'idada ficilka noocaan ah waa mida markaad dhimato, guriga waxaa lahaanayo qofka ama dadka aad dooratay adigoon aadin maxkamada dambiyada. Tan waxay badbaadisaa waqti iyo lacag.

Warqada Guri Wareejinta Intaad Nooshahay waa dokumenti sharciyeed. Rugta Warqada Guri Wareejinta Intaad Nooshahay, waxaad kala hadli kartaa qareen haddii ay kugu haboon tahay. Haddii ay kugu haboontahay, qareenka ayaa kaa caawin karo inaad qortid waraaqaha Warqada Guri Wareejinta Intaad Nooshahay ee aad u baahantahay. Qareenka ayaa sidoo kale ku siinayo tallo ku saabsan canshuur wareejin walba ee laga yaabo in laguugu leeyahay. Ugu dambeyntii, qareenka ayaa kuu sheegi karo tallaabooyinka aad u baahato inaad qaadid si aad u dhameysid nidaamka Warqada Guri Wareejinta Intaad Nooshahay. Ma jiraan qarash adeegyadaan ah, si kastaba waxaa jiro qidmooyinka qaar ee la xiriiro ku diiwaaninta ficilkaaga caasimadaada/magaaladaada. Waxaan ku dul mareynaa kuwaan siminaarka.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan ELED iyo qaar ka mid ah su'aalaha badanaa la isweydiiyo waxaa laga heli karaa dokumentiga halkaan ku xiran. Su'aalaha Badanaa La isweydiiyo (FAQs) ee ELED

Siminaarka Onleenka

Isniinta, Sebteembar 16, 2024
Galabka–1:00 pm AMA
5:30–6:30 pm

Duubitaanka waxaa la helayaa haddii aysan kuu suurtogaleynin inaad ka qeybgashid siminaarka inta lagu jiro mid ka mid ah waqtiyadaan. Fadlan la soo xiriir buyahome@getahome.org oo helitaanka duubitaanka.

Rugta caafimaadka Qof ahaanta

Arbacada, Oktoobar 2, 2024
11:00 am–3:00 pm (30 daqiiqo balamaha shaqsiga)
Champlain Housing Trust
88 King Street, Burlington

Siminaarka kadib, ka qeybqaatayaasha waxay helayaan fursada loogu adeego balan 30 daqiiqo oo ay wehliyaan qareenka si dib loogu eego iqtiyaarada Warqada Guri Wareejinta Intaad Nooshahay. Waxaan bixineynaa warbixin badan oo ku saabsan waxa aad la imaaneysid siminaarka iyo dabagalka isgaarsiinta.

Waxaa ka faala qaaday Vermont Legal Aid iyo Champlain Housing Trust.